


# CABASHO GUDBINTA

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho daryeel caafimaad oo tayo leh, ammaana ah iyo in laguula dhaqmo si xushmad leh. Soo sheegida waxaad saluugsan tahay markay tani dhicin waxay ilaalineysaa xuquuqdaada waxayna hagaajin kartaa nidaamka caafimaad ee dhammaan dadka reer Victoria.



Wixii macluumaad dheeraad ah ama si aad ugu buuxisid foomka cabashada online, booqo [hcc.vic.gov.au](http://hcc.vic.gov.au)

Wac **1300 582 113** inta u dhaxeysa 9 subaxnimo iyo 5 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha si aad uga hadashid cabashadaada.



# CABASHO GUDBINTA





## MAXAAN KA CABAN KARAA?

Arimaha aad ka caban kartid waxaa ka mid ah:

- macaamil aadan ku qancin
- dhibaatooyinka u gudbinta ama jiifinta isbitaal
- xiriirka xun
- xushmad darro ama arimaha gaarka ah
- dayacaad ama dabeecad aan xirfad aqooneed lahayn
- si khaldan u isticmaalka maclumaadka caafimaadka

Waxaad ka caban kartaa adeeg bixiye caafimaad oo kasta ee Victoria ku yaal. Tan waxaa kamid ah isbitaalada gaarka ama dadweynaha, adeegyada caafimaadka bulshada, bixiyayaasha diiwan gashan sida dhakhaatiirta iyo kuwa ilkaha ama kuwaan diiwaagashaneyn ee adeega bixiya sida la taliyayaasha iyo daaweyayaasha bedelka ah.

Waxaad sidoo kale ka caban kartaa cid kasta oo heysa maclumaadkaaga caafimaadka, oo ay ku jiraan adeeg bixiyayaasha aan caafimaadka ahayn sida dugsiyada ama jiimamka, wax ku saabsan siday maclumaadkaas u maareeyaan.

## SIDEE BAAN CABASHO U SAMEEYAA?

Tallaabada ugu horeysaa waa inaad ogeysiisaa adeeg bixiyahaaga waxaad saluugsan tahay. Haddii tani aysan xalin arinta ama aad dareemeyso inaadan u tegi karin, caawimaad na weydiiso.

Cid kasta waxay cabasho noogu soo gudbin kartaa online, taleefan ama qof ahaanba. Haddii aad u cabaneysid qof kale, waa inaad heshaa ka raali ahaanshahooda mar ka koowaad.

## MAXAA KU XIGGA OO DHACAYA?

Waxaan la shaqeeyaynaa adiga iyo adeegbixiyuhu inaad si dhakhsa ah u xalisaan cabashada, si caddaalad oo wax ku ool ah.

Waxaan kaa caawin karna inaad hesho:

- sharaxaada wixii dhacay
- raalli gelin
- helitaanka daaweynta
- helitaanka diiwaanka
- magdhow ama lacag celin
- bedelaada qorshaha ama sida wax loo qabto si looga hortago dhibaatooyin mustaqbalka.

Waxaan sidoo kale bilaabi karna baaritaan toos ah ugana digi karna dadweynaha waxa ku saabsan adeeg bixiyayaasha caafimaadka ee khartaa ah.

Adeegeenu waa bilaash, qarsoon oo dhexdhedaad ah.

### Nala soo xiriir

Wixii maclumaad dheeraad ah ama si aad ugu buuxisid foomka cabashada online, booqo [hcc.vic.gov.au](http://hcc.vic.gov.au)

Wac **1300 582 113** inta u dhaxeysa 9 subaxnimo iyo 5 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha si aad uga hadashid cabashadaada.

Na soo booqo ama noogu soo qor warqad Level 26, 570 Bourke Street, Melbourne Victoria 3000



Dhagoole, maqalku ku adag yahay ama hadalka wax ka qaba? [relayservice.gov.au](http://relayservice.gov.au)



Turjumaan ma u baahan tahay?  
TIS National: **131 450**